

**KU GUDDOOMIYAHA BAARLAMAANKA J F S**

**UJEEDO: MOOSHIN KA DHAN AH WASIIRKA AMNIGA QARANKA**

Annagoo ah Xildhibaanada magacyadoodu hoos ku qoran yihiin, kaddib markii aan fiirinnay qod 69aad iyo qod 126aad ee Dastuurka JFS iyo qod 34aad ee Xeer Hoosaadka Baarlamaanka JFS, waxaan aad ugu kuurgalnay su' aal wadareedkii maalmihii lasoo dhaafay Baarlanku weydiiyey Wasiirka Amniga **Qaranka Mudane Abdikariim Xuseen Guuleed**.

Kaddib markii dooddii dhammaatey, waxaan qiimeyn ku samaynnay Jawaabihii uu bixiyey **Wasiir Abdikariim Xuseen Guuleed**, waxaana noo soo baxday arrimaha hoos ku qoran:

- 1) Wasiirku wuxuu xilka Wasiirnimo hayey muddo Sannad iyo Bar ah, asagoo xukuumaddii tan ka horreysay ay xilkiisa ka mid ahayd dhacdooyinka lagu haysto Wasaaradda Arrimaha Gudaha sida Maamullada iska soo horjeeda ee dalka geliyey qalalaasaha siyaasadeed iyo kan amni intaba
- 2) Wuxuu Wasiirku Masuul ka ahaa Amniga Qaranka tan iyo markii ku-meel gaarka laga baxay asagoo gacanta loo geliyey Miisaniyad gaareysa \$17 million oo Baarlamaankani ansixiyey si loogu sugu nabadda-miisaaniyaddaas oo aan Qaranka loo baajin wax muuqdana lagu qaban
- 3) Dhacdooyinkii ugu xumaa ee amniga qaranka aafeeyey waxay dhaceen intii uu xilka hayey Wasiir Abdikariim Xuseen Guuleed sida Dhacdadii weerarkii lagu qaaday Xarunta Madaxtooyada taasoo u geysatay dhaawac culus sumcadda dawladnimo-Ma jiro cid loo soo qabtey ama masuul ku waayey xilkiisa
- 4) Weerarkii lagu qaaday UNDP-da oo ujeeddadiisu ahayd in ajaaniibtu iskaga baxaan dalka-lagu naafeeyo dawladnimada, khasaare nafeed iyo mid maalba kasoo gaaray shacabka iyo ajaaniibta intaba-ma jiro cid loo soo qabtey ama xil gudahsho la' aan ku weyday xilkeeda

|                               |
|-------------------------------|
| JAMHUURIYADDA FED. SOOMAALIYA |
| GOLAHA SHACABKA               |
| SOO GELID                     |
| NO: 1063                      |
| TR: 6/5/14                    |
| SAXIIX: <i>[Signature]</i>    |

*Guddoomiye*  
Waan HUBIYEH IN UU XILKASHO  
IYO DASTUURKA WAXA QARANKA  
G. 15/11/14 *[Signature]*


- 5) Dhammaan Xidhibaannadii Baarlamaanka JFS iyo hawl-wadeennadii iyo saraakiishii lagu laayey falalka kala duwan-ma jirto cid loo xiray ama xil ay gudan weyday looga eryey shaqada
- 6) Waxaa dagaallo kasoo cusboonaadeen Gobollada Shabeellada Hoose oo dad fara badani ku dhintay, Gobolka Hiiraan, iyo Shabeellada Dhexe oo sidoo kale ka taagan yihiin colaado khasaare nafeed iyo maalba geystay-Markii uu Jawaabayey Wasiirku mar qura ma muujin iney masuuliyaddiisa ahayd inuu baajiyo colaadahaas

Sidaas awgeed, Mudane <sup>WASIIRE</sup> Guddoomiye waxaan soo jeedinaynaa in **Wasiir Abdikariim Xuseen Guuleed** laga xayuubiyo mansabka Wasiirnimo maadaama uu ku fashilay masuuliyaddii loo dhiibay oo weliba uu hayey masuuliyaddaas waqti dheer oo ku filanaa inuu isbeddel la taaban karo ka sameeyo Nabadgelyada Qaranka taasoo fure u ah xalka dhibaatooyinka dhaqaale, siyaasadeed iyo ijtimaaci ee ummaddeenna haysta.

Muq 03/05/2014

Xildhibaannada Saxiixay

- 1- Abdulkariim Yusef Hassan
- 2- Shariye Mumin A. Farah
- 3- Osman Haji Ali Nur
- 4- Suudow Aada Abusahi
- 5- Osman Muhiid Abdi
- 6- Ayy. Jahir Hassan Asdu
- 7- Bishaaro Cabdi Diiniye
- 8- Mohamed Kerow Mohamed
- 9- Cali sheekh Maxamed
- 10- Maxamed Cumar Ceynany

12. Ahmad Omar Islow 
13. Ahmed Maymou C/te 
14. Abdullh. James 
15. Aweis Abdullh. 
16. Naur Max. Mund. Tusen 
17. Hussein mahamud Muse 
18. Mohamed Sh. Aden 
19. OMAR Mohud Mohied 
20. Ali-nur Hussein Bodaye 
21. MUSA Ahmed Ismail 
22. Alacima mahamed Gaad 
23. Yusuf mahamed Ismail 
24. Ibrahim Saalax Dayballah 
25. C/gadii M/ku Naur 